



DIGNIIN

BUUGA DHALINTA
SOMALIYEED

WQ : LIIBAAN MOHAMETT

MAHAD CELIN

Waxaan marka koowaad u mahad celinayaa Allah (SW) Oo Nagu sugay islaanimo.

Marka labaad waxaan u mahad celinayaa Waalidiinteyda dhammaan anigoo kala reebeen.

Waxaan kaloo u mahad celinayaa Qof Walba oo sabab u ahaa inaan buugaan qoro.

Waxaan u mahad celinayaa qof walba oo buugaan aqrista kadibna la wadaaga Asxaabtiisa.

AFEEF

Waxaan cid kasta ka raali galinayaa wax kasta oo qalad ah oo aay
kitaabkan ku arkaan, Waayo bani'aadam ayaan u ahay qaladkaas
Bani'aadam kuna waxa uu sameeyo lagama waayo ceeb iyo
nusqaan.

Midka aanan qaldamin kitaabkiisuna afeef lahayn Waa alle {SW}

Wixii khalad ah aad ku aragto Halkaan iigu soo dir

<https://api.WhatsApp.com/send?phone=+252610803564>

Buugan waa buugeygii Labaad oo ay ii suurto gashay inaan Qoro
Kadib markaan arkay dhibka iyo dhibaataada na haysata Haddaan
dhalin yaro nahay

HORDHAC

Waxaan ku bilaabayaa magaca Allah, Midkii abuuray
samaawadka, Arlada iyo intii ku dhex nool, Allaha uumay koonka
iyo intii ku dhex nool.

Eebe idankii Waxaan buugan kuso koobaya Gabay, Maah maah,
Murti iyo Sheekooyin.

•Liibaan mohamed.

Soo saaristii koowaad

•Mogadishu - Somalia

20 August 2024

Ujeedada Buuga

Buugan waxaan u qoray markaan arkay dhalin yaro badan oo Ka
cabaneysa caadooyin kala duwan sida ragga qaar in ay
gacantooda ka raadshaan Raaxo yacni **Siigada**, Kama Gaban
doono Xaqiiqada inta uu socdo Buugan
Dadka qaar wey ka gabadaan ayagoo is dareen siinaayo Waxaani
iney tahay kaliya Ceeb waxaad kaso qaada Anigoo oo kula
Fadhiyo kadibna ku leh iska daa caadadan xun oo mustaqbalka
naftaada wax yeeleen karta.

Fiiro Gaar ah

Buugan Ma aqrin kartid haddii aad ka yar tahay -15

Waxaa loogu talay galay +15

Mahadsanid.

Caadada Xun

- Waa Maxay Caadada Xun ama **siigada** ?
- Dhibaato miyeey leedahay ?
- Sideed iskaga Joojin kartaa caadadan ?

Waa maxay caadadan ?

Caadadan Waa arrin ay dhalinyarada sameeyan in aad tagto meel aysan dad kale joogin yacni kaliga aad tahay kadibna aad sawirato in ay kula joogto naag qayaali ah ama aanan jirin Kadibna aad gacantaada raaxo ka raadiso.

Caadadan kuuma ogolaaneyso in aad noqoto waxa aad mustaqbalka rajeyneso kuuma ogolaaneyso in aad noqoto nin ragg ah oo dhammeystiran kuuma ogolaaneyso in aad noqoto aabe fiican ama sowj fiican waxay kaa qaadeysaa karaamadaada Waxay Ku dheeleysaa hamigaagii iyo hadafkaagii hadhowna waxaad noqoneysaa mid shalaayo, Shalaytana ma horeysee weey dambeysaa , Raali maka tahay in aad xabsigaas madow ku jirto Kadib marka aad caadadan sameyso waxaad go'aan ku gaareysaa in aadan mar dambe u laaban doonin Waqti yar kadib waxaad is arkeysaa adigoo dhex fadhiya oo dhex dabaalanayaa caadadii xumeed.

Dhibaataada ay leedahay caadadan

Waxaad noqoneysa mid Caafimaad ahaan u liita cimri ahaana si dhaqsi ah udhammanaya in aad dareento caajis xilliga salaada in aad noqoto caasi waalidiin alle iyo nabigiis ka furtay waxaad noqoneysa xitaa mid nafsad ahaan udhinta yacni in aad adoo nool dilanto , Xitaa waxaad Weyneesaa dabeecad aad kula joogto asxaabtaada

Xakameynta naftaada waa dareen weyn oo aanan u dhigmin dareen kale.

Caadadan iney ku saameysay waxaad ku ogaaneysaa in aad dareento xanuuno fara badan sida in aad jilbaha xanuun ka dareento dhabarka kala gooskiisa in aad ka dareento Xitaa naftaadu waxay la qabsaneysaa in ay mar kasta muuqaladaas xun xun daawato oo ay ka dhigato wax caadiyan adiga kuu fiican, Sidoo kale waxaad isku arkeysaa wal wal guud ahaaneed dabeecad xumo Dhafar joogto ah in aad mar kasta tahay mid maqane jooge ah
Nasiib xumo sannadkan waxaa aflaantas xun xun daawado ilmo 10 sanno jir ah iyo kuwo kasii yar waxaana sababay in ay waalidka u dhiibaan mobeelada ama ay ku iloowaan

Sideed u joojin kartaa caadadan

Markii ay kugu soo dhacdo caadadan si aad u fiirsato jirar ay leeyihiin dumarka kuwooda raqiiska ah ka istaag meesha aad joogto haddii aad qol ku jirto kaligaa ka bax oo Tag banaanka iyo meelaha ay dadka joogan si ay maskaxdaada uga baxdo oo aad u ilowdo caadadaas xun ,

Taasi waa go'aan adag oo idiin dhaxeeyo adiga iyo naftaada ka hor inta aadan joojin weydii naftaada suaashan maxaan u rabaa in aan joojiyo caadadan ?

Ma waxaa ii soo laabanayo karaamadeydii aan dadka ku dhex lahaa ma waxaan noqonayaa nin ragg ah oo masuul ah

Mar walba oo uu qofka siigeesto waxaa sii kordhaayo arragtidiisa madow oo nolasha ku aadan, Waayida dhadhanka nolasha Heer uu qofku gaaro xaalad depression ah yacni murug weyn ah.

Hadii aad dareento in aad caadadan sameyn rabto Qaado go'aan ah in aad markaas seexato ama isku day in aad soonto maalmaha qamiista iyo isniinta ah .

Haddii aadan caadadan hadda iska deyn ogoow in aadan hadhow iska Deyn karin maxaa yeelay jirkaaga ayaa la qabsaday xitaa hadii aan noqoto mid xaasle ah iskama deyn kartid caadadan

Bilow hadda si aadan hadhow ugu dhibtoon joojinteeda Haddii aad is leedahay nin dhalinyaraa ahay xaas malihi markaan xaas yeesho ayaan iska deynayaa. may taasi waa been Cad oo aad naftaada usheegtay iskama Deyn kartid midaas mudane isku day inaad hadda joojiso caadadaas.

SINADA

Wiil iyo gabar ba midkaad tahay waxaan kaaga digayaa wllkeyow inaan iska ilaaliso **Sinada**.

Waxaan kaaga sheekeynayaa qiso yar oo ku saabsan Sinada.

- **WAA MAXAY SINO ?**
- **DHIBAATADA SINADA !!**
- **QISOOYIN KU SAABSAN SINADA.**

WAA MAXAY SINO ?

Sinadu waa cudur ku dhaca dadka kaso ku kalifaayo in ay iskugu galmoodaan galmo xaaraan ah oo aan Alle raali ka ahayn .

DHIBAATADA SINADA !!

waxyaabaha imaan doono waxayna u dhacaan sida isagoo arkaayay oo kale, taasoo ka mid ah mucjisooyinkiisa scw, waxyaabihii uu ka hadlay nabiga SCW Waxaa ka mid ah xanuunadan faraha ba'an ku hayo bani aadamka waqtiyadan dambe ee aan horay loo arag. Wuxuu yiri nabiga Scw:

لم تظهر الفاحشة في قوم قط حتى يعلنوا بها إلا فشا فيهم الطاعون والأوجاع التي (لم تكن في أسلافهم الذين مضوا.....الحديث) رواه ابن ماجه في سننه

(Dad haday ZINADU ku faafto ilaa ay gaaraan heer ay muujiyaan soona bandhigaan banaanka, waxaa iyagana ku faafo FURUQ iyo CUDURO AANAY AABAYAASHOODI HORE QABIN.....)

Waxaan marqaati ka nahay inay zinadu faaftay ilaa ay noqotay shay lagu xarragoodo oon laga xishoon, wadooyinkii zinada oo dhan ayaa lagu fasaadiyey caalamka, filmaan anshax xuma ah, is dhex gal lab iyo dhaddig aan dhawrsaneyn, heesihii culimada ku tilmaameen (الغنا بريد الزنا). Heesuhu waa dhambaalada zinada) ayaa noqday shay caadi ah, oo hadaadan dhageysan waaba lagula yaabi, dharkii asturka iyo xijaabka ahaa waxaa lagu badashey qaawanaan lab iyo dhaddigba !!!

Haday sidaa tahay maxaa diiday in nalagu sallado cuduro aan horey loo arag loona maqal. Xanuunada lagu kala qaado galmada xaaraanta ah waa 63 cudur, HIV AIDS oo kaliye qarnigii taga ayaa 172,000,000 malyan oo qof xasuuqay !!!! Hadii aad adiga is badashid oo aad hanuuntid hebelna isbadalo anna aan isbadalo, bulshadoo dhan baa isbadali, maxaa yeeley bulshada la sheego waa aniga iyo adiga iyo ayada iyo asaga ma fahantay?....

Ku duceyso ducada nabiga scw ee ah

اللَّهُمَّ إِنِّي أَعُوذُ بِكَ مِنَ الْبَرَصِ، وَالْجُنُونِ، وَالْجُدَامِ، وَمِنْ سَيِّئِ الْأَسْقَامِ (رواه أبو داود

(Allahayow waxaan kaa magan galay baraska, iyo waallida, iyo juudaanka, iyo cudurrada xun xun.

SOO KOOBIDA SINADA

SH. Faysal waxa uu sheegay inay khudbadu ku saabsan tahay, mid ka mid ah denbiyada waa-weyn taas oo ah Sinadda. Waxa uu sheegay inuu kusoo qaadan doono ciqaabka ka dhalanaya iyo cidhib-danbeedkeeda.

Waxa uu sheegay in sharcigu marka uu ogaado dhibaata shayga ka dhalanaysa iyo aafada uu bulshada ku hayo inuu adkeeyo ciqaabta, iyada oo looga gol leeyahay inay dadku ka taxadaraan.

Shiikhu waxa uu soo qaatay aayado iyo axaadiis ka hadlaya SINADA. Sida kuwa hoos ku qoran: Ilaahay wuxuu yidhi,

{وَلَا تَقْرَبُوا الزَّانَا إِنَّهُ كَانَ فَاحِشَةً وَسَاءَ سَبِيلًا}

Sidoo kale nebi muxamed wuxuu yidhi:

ثَلَاثَةٌ لَا يُكَلِّمُهُمُ اللَّهُ يَوْمَ الْقِيَامَةِ وَلَا يُزَكِّيهِمْ وَلَهُمْ عَذَابٌ أَلِيمٌ: شَيْخُ زَانٍ، وَمَلِكٌ كَذَّابٌ، "وَعَائِلٌ مُسْتَكْبِرٌ".

Shiikh faysal waxa uu xusay in Alle is hortaagay waddo kasta oo fududayn lahayd in qofku ku dhaco Sino, sida in la booqdo guryaha dadka gayaanka ahi deggen yihiin, inay gabadhu muxrim la'aan safarto, in dumarka lala gaar noqdo IWM.

Waxana uu soo jeediyey in dhalinyaradu ka fogaadaan filimaanta xun-xun ee gaaladu samayso.

Waxa uu sheegay inay adduunka maanta la dhacayaan wixii Reer Caad, Qowmu-Luud iyo Umadihii la mid ka ahaa lagu cadaabay, balse dul-qaadka Alle iyo inaynu ummadii nebi Muxammed nahay awaadeed la inoogu dhaafayo iyo sidoo kale in daartani Ay tahay daartii camalka, ciqaabkiina uu danbeeyo.

Ciqaabta ka dhalanaysa: waxa shareecadu u qaybisay xukunka qofka sinaysta laba qaybood

1. Qofka dhalinyarada ah ee sinaysta isla markaana aan guur hore soo marin, waxa lagu ciqaabayaa boqol jeedal. Halka
2. Qofka guur hore soo maray ee sinaysta waxa lagu dilayaa dhagax! Taas oo ah ciqaab aad u adag in qof isagoo nool sida dhagxaan loola dhacayo, nafta lagaga jaro.

- Calaamadaha qofka sinaysta: dadka xumaantaas sameeya waxa lagu ciqaabayaa cuduro aan lagu sallidin dadkii innaga horreeyey, iyada oo taasi ay maanta muuqato. Sidoo kale waxa ka mid ah, wejiga oo madoobaada, laabta oo cidhiidhi noqota, risiqa oo ku adkaada, diiqad iyo nolosha qofka oo raaxo-beesha. FG: Waxyaabo kale oo sinada ku saabsan ayuu shiikhu sheegay oo aanan qoraalka ku xusin.

Sinada Allah naga haayo

Ugu horeen intaan ugalin dhaxalka iyo dhibaataada ziyanada waxaa xusid mudan in zinada lagu xaarameeyey dhamaan kutubihiii lasoo dejiyey oo xukunkeeduna isku mid ahaa rag iyo dumar, shabaab iyo shayb . Dhilaysiga(zinnada) jinsi ugaaraa malahan waloow dadku sheeg sheegaan in 2da jinsi midkood kubadan yahay sameenteeda, balse waxaa xadiis saxiixaa kusoo arooray in Alle (sw) uu abuuray 100 dareen(shahwo) 99 kamidaa dumarka ayaa lasiiyey halka sooharayna ragga ayaa lasiiyey, silamidaa Alle(sw) wuxuu abuuray 100 xishood 99 kamidaa dumarka ayaa lasiiyey halka sooharayna raguu ubaaqi noqday. Waxaa halkaa culimada diinta kuxeel dheer kafityoodeen in dareenka dumarku kaxoog badan yahay midka ragga haddii aan lagu kaalmeen laheen xishoodka ay halis ahaan lahaayeen dumarka shartooda !! Hadaba zinnadu waxay kamid tahay danbiga 2aad ee Alle agtiisu ugu weyn marka laga reebo shirkiga, qataranteed taasaa udaliilaa.

Waxaa sidoo kale laga weriyey imaamu shaafici(rc)ama zayid Ali abii daalib(rc)midkood in ruuxii kuzineesta firaash qurux badan in isna gabartiisa, naagtiisa, walaashiis, ama hooyadiis looga zineesan darbi cidlaa xumaanta ay leedahay awgeed marka ruux kastaa waxaa lagudboon inuu kafogaado zinnada waayo waa deen layskaga guddo dunida guudkeeda. Ruuxii ummada nabad galshaa isna ehelkiisa ayaa loonabad galshaa aduun iyo aaqiyo.

Qarnigan iyo kii tagayba waxaa dunida kusoo batay cuduro aan la,aqoon daawadooda iyo sababaha dhaliyey, tusaale ahaan cudurka IDS-ka waxaa sababay dhilayziga(zinada). Dhaqaatiir udhalatay dalka France ayaa sheegtay in cudurka IDS-ka oo luqadooda lagu yiraahdo ZIDA in uu lamacnayahay Zinada oo

diinta islamku sheegtay dhibaataadeeda sidaa awgeed waxay dadkooda kubooriyeen in ruux kastaa lamaanihiis ku,ekaato oo xadgudubka sharci darada lajoojiyo.

Dhibaatooyinka iyo goobaha zinnadau kubadan tahay !!

Dhinaatooyinka ugu daran ee laga dhexlo zinadda waxaa kamidaa ruuxa oo kasabkiisa yaraado, nuurka wajiga iyo jirka oo daciifo, tabardari joogtaa, dabeecad qalafsan oo uu dadweenaha kula dhaqmo, xishood darri iyo waxyaablo kaloo aad uxunxun. Goobaha Zinada laga helo waxaa kamida shineemooyinka oo zinada laga barto daawashada film-da waayo waxaa hubaalaa in TV-ga daawashadiisa 2 arimood laga barto oo kala ah dhilaysi ama tuugeesi(xatooyi) 2daas arimood midkood ayuu kusifeesan yahay qofka daawada film-da anshaxa daran, waayo fariistaas ayeen dadka gaarsiiyaan film-da, waxaa kaloo zinada laga barta goobaha xun xun sida meelaha loo qayilaad doonto oo waayadan danbe isku bedeshay in hadii laan lacalaliyo lugna lajiido naruuro tahay, silamidaa goobaha dhalinyaru kubadan tahay sida,jaamacadaha, dhugsiyada sar sare iyo college-yada ayaa kuhadal heenta haasaawaha kubadan yahay halkaas oo shaydaanku wax maleegi karo maadamao shabaab kubadan yahay goobahaas.

Sidee looga hortagaa Zinnada?

Alle wuxuu raga armay inay indhahooda ku,eegin dumarka, Dakar koodana xafidaan sidaa ayay aduun iyo aaqiyo libaan kuhelayaan, silamidaa Alle wuxuu dumarka faray wuxuu ragga faray iyo inaysan jirkooda muujin oo uu cawro yahay inta yaree laga reebay maahee. Talaabadan waa habka kaliyaa ee zinanda looga hortagi karo. Waxaa kaloo haboon waxyaalaha munkarka meeshuu kubadan yahay inaadan tagin sida rubaayadaha,

shineemooyinka IWM – Owoog xibinkastoo jirka kamidaa inay zineesankarto balse coorada hoose ugu dara n tahay –macnaa dhagaha, indhaha, gacmaha waa lagusameen karaa zinno danbina waa kaasoogarayaa.

Waxa aad iyo aad iigu yaab badneed maraan nasiib uyeeshay meeluu qudabad kajeedinaayey baadari France-siis oo kusugnaa dalka Djabouti inuu dadka kula dardarmaayey inay zinada joojiyaan oo ruux kastaa ku,ekaato wuxuu heesto. Murtida soomalida waxaa kamidaa hadaad aragto habar balaayaa waxay ahaan jirtay gabar balaayaa –taasoo loola jeedo qofka qofka wuxuu caado kayeeshay rayanatiisa waynaantiisana waa dabo socotaa--- hadaad dhilay ama dhilo ahaan jirtay faracaaga waa kusooduxee ileen deen qabaad aheedee Ilaahoow magantaa!!

Soo layaab maahan in ninna uusan jecleen in walashiis, hooyadiis ama gabartiisa laga dhileesto misana isagu zineesan gabadha oo falkas xun kusameen nin ayaa dhalay, lahdashay, dhashay ee ninkii doonaayo in owlaadiisa unabdgashoo iska nabadgali-

Tolo waayo arag:-

Dadkoo waa danbaabaan waxase uqeer badan kuwa intay danbi galaan ilaahooda soxasuusta oo danbi dhaaf weediisto. Ruux marxuum ayaa iisheekeeyey wuxuu iisheegay inuu aad iyo aad shaydaaku uga xoogbadtay oo uu kazineesan jiray dumarka ay kujirana kuwooda xaslayaasha ruuxaas qudhiisu xaas iyo gabdho badan ayuu lahaa, waligiis kumusan fikirinin dhibka uu raga kale ugeesan la,aargudi doono ilaa uu kuwaano qaatay oo indhihiisu ku,arkay xaaskiisa oo nin kula jjiifo sariirtiisa iyo gabadhisa oo darbi xun looga diin gudaayo –marka Alle miyuusa cadaalad aheen oo xumaam in xuman lagu gudo nafarin marka taas waxaa laga qaadan in ummada layska nabdgalso sinabad aad uheso.

Dhalin yarada hadda kadib baran doonto waxaan leeyahay waa godkii aad ku mustaqbal weyn lahayd hadii aad hada wadid na wllkey muslimkow ka fogoow oo sameyso jadwal yar booskiisa gali Mahadsanid waxaan rajeynayaa inaan Talooyinkan digniintan iyo waanadan aad qaadataan

GABAGABO:-

Haddii aad walaal wax yar iga Faa'iiday iiso duceey
Maxaa Yeelay Dunidan lama wada joogaayo
Waa gabagabada buugii yaraa ee digniinta ahaa
Intii aqrisatay ajar iyo xasanaad aan laso koobi
karin Allah idinka siiyo.

DHAMAAD